

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **12/01/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- FARAH MOHAMED SALAD, Ina Xaawo Galleyr Kheyre, Somali ah, Ku Dhashay: Guriceel, Sanadkii: 15-04-1971, Sita: Passport, Lr. P01203258

LA WAKIISHE:- DAHIR ADEN MOHAMUD, Ina Saboodo Muxumed Ciyow, Somali ah, Ku Dhashay: Dhuusamareeb, Sanadkii: 10-08-1969, Sita: National Id, Lr. 26908102203412, Kana soo baxay Waaxda Socdaalka iyo jinsiyadaha soomaaliya

B- Aniga oo ah **FARAH MOHAMED SALAD**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **DAHIR ADEN MOHAMUD** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo ah dhamaan saamiga aan ku leeyahay Shirkadda **SHABEELE A2 WELL DRILING CIVIL ENGINEERING GENERAL CONTRACTOTS CO.** saamigaas oo dhan 30% (Boqolkiiba sodon), sida ku cad warqadda Dhismo shirkad saamiley xadidan **Ref.B197/102245/021 Tr. 16/08/2021**, uu maamuli karo, gadi karo hantida magaca shirkadda ku qoran, iguna matali karo magaceyga goob iyo madal walba ee la iiga baahdo ee ku saabsan shirkadaas **SHABEELE A2 WELL DRILING CIVIL ENGINEERING GENERAL CONTRACTOTS CO.** isla markaana ii saxiixi karo dhamaan heshiisyada shirkadda ay galeyso, sida heshiisyada iibka hantida shirkadda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **DAHIR ADEN MOHAMUD** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Saamigaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **DAHIR ADEN MOHAMUD**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey FARAH MOHAMED SALAD, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

FARAH MOHAMED SALAD

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

DAHIR ADEN MOHAMUD

1- ISMAIL MOHAMED ELMI

2- MOHAMED ALI SALAD

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1330/T.P.N/25, Tr. 12/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- FARAH MOHAMED SALAD** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- DAHIR ADEN MOHAMUD** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: C/qan



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
BENADIR TIMA ADDE PUBLIC NOTARY OFFICE

Dhismo Shirkad Saamiley Xadidan: SHABEELE A2 WELL DRILING CIVIL ENGINEERING AND GENERAL CONTRACTOTS CO.

MOGADISHU-SOMALIA

2021



XAFIISKA NOOTAAYAHA BENAADIR TIMACADDE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-9031111 / +252-61-5892861
E-mail Address: bnadirtimacade@gmail.com
HQ: Mogadishu, Somalia



Ujeedo: qoraal lagu dhisayo Shirkad Saamiley Xadidan lana magac baxday SHABEELE A2 WELL DRILING CIVIL ENGINEERING AND GENERAL CONTRACTOTS CO.

Muqdisho, maanta oo ay tahay 16/08/2021 Aniga oo ah Dr: C/raxmaan Maxamuud Cali (timacadde) Xafiis ku leh degmada wadajir agagaarka KM4 lehna sharciyadda nootaayada magaceedu kor ku qoran yahay waxaa marag la'aan horteyda yimid

1. **Daahir Aadan Maxamuud**, Soomaali ah, ina Samawada Mohamed Iyow ku dhashay Dusamareb sanadkii 1969-kii, degan Mogadishu, lehna Leysinka No.13683 ee warqadaan ku lifaaqan.

2. **Abdirizak Mohamed Ahmed**, Soomaali ah, ina Madina Sheikhow Dhuhulow ku dhashay Harardere sanadkii 1968-dii, degan Mogadishu, lehna Passport-ka P00958959 ee warqadaan ku lifaaqan.

3. **Farah Mohamed Salad**, Soomaali ah, ina HAwa Galleyr Kheire ku dhashay Guriel sanadkii 1971-dii, degan Mogadishu, lehna Passport-ka P00622767 ee warqadaan ku lifaaqan.

Ku wasoo anigu nootaayo ahaan aan aqoonsaday habsaday in magacaas la yiraahdo sida ku cad Aqonsiyadooda halkaan ku lifaaqan, iyagoo iga codsaday in aan u qoro xeer shirkadeed (Company Law). Waana sidaan xeerku:

Qaybta 1aad

❖ Magaca, Saldhiga, Ujeedada iyo muddadda jiritaanka Shirkadda

- 1) Waxaa La dhisay Shirkada la magac baxday SHABEELE A2 WELL DRILING CIVIL ENGINEERING AND GENERAL CONTRACTOTS CO. Taariikhda la aasaasay shirkada waa December 1th, 1999 waxaana lagu aas'aasay Magaalada Mogadishu
- 2) Saldhigga shirkadda waa Muqdisho, waxayna shirkaddu xarumo kale ka furan kartaa goboladda dalka.
- 3) *Astaanta shirkadu waxay ka mid tahay hantida gaarka ah ee shirkada*
- 4) *Ujeedada shirkaddu waa adeegayada guud (general Service), dhismaha, qandaraasyada iyo qodista ceelasha*

XAFIISKA NOOTAAYO BANAADIR, TIMACADDE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-5592861
E-mail Address: timacadde@hotmail.com



5) Muddadda jiritaanka shirkaddu waa 99-sano oo ka bilaabaneysa maalinta ay xubnaha shirkadu wada saxiixaan, mudadaas iyada ah haddii xubnaha shirkadu ku heshiiyaan iskuna raacaan waa la kordhin karaa waana la yareyn karaa inta aan la gaarina waa la baabi'in karaa haddii la isku raaco.

Qaybta 2aad

❖ Maaliyadda shirkadda (Asadka Shirkadda)(Capital of Company)

1) Maaliyadda shirkadu waa **\$170,000 (boqol iyo todobaatan kun oo dollar)** oo u kala qaybsanta 100 saami oo kiiba qiimihiisuna yahay \$1,700 (kun todobo boqol oo dollar) waxaana loo kala leeyahay Saami aan sineen.

2) Tirada Aas'aasayaasha Shirkadda waa (3) saddax xubnood Aas'aasayaasha shirkadda waa saamiley kala saami badan tiradooduna waa saddax (3) qof, waxaana saamile kasta wax ku qaadanayaa hadba inta saamigiisu la eg' yahay faa'iido ama khasaaro, taas oo imaan 3art aka dib marka laga bixiyo dhammaan qarashkii lagu galay howlaha bishaas, sida mushaar, kiro, biyo, koronto, nadaafad, dayactir, sadaqo ama seko IWM:

Liiska Magacyada Aas'aasayaasha shirkadda iyo Saamigiisa

Tiro	Magaca	Saamiga	Boqolkiiba	
1.	Daahir Aadan Maxamuud	\$85,000	50%	Aas'aase
2.	Abdirizak Mohamed Ahmed	\$51,000	30%	Aas'aase
3.	Farah Mohamed Salad	\$34,000	30%	Aas'aase
	GRAND TOTAL	=\$170,000	100%	

3) Saamiyada shirkaddu waxay ka kooban tahay 100 saami oo magacaaban

- ✓ Saami kasta oo gaara 10% rasumaalka shirkadda wuxuu leeyahay hal cod.
- ✓ Shirkadda waxaa lagu soo gali karaa 10 saami oo qiimahiisu yahay kiiba 1,700\$

YAHISKA NORTAAYO BANAADIR TIMO CADDE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61 903333 / +252-61 5592861
E-mail Address: timocadde@gmail.com
HQ of the firm: www.timocadde.com



✓ Saamilihii shirkadda ka gataa saami waxaa faa'idiisa laga goonayaa 30% waxaana iska leh aasaasayaasha shirkadda.

4) Aas'aasayaasha Shirkadda waxay leeyihiin Xurmo gaar ah, ayagaana soo magacaabaya Maareeyaha Shirkadda, Saamileydana waxay soo magacaabayaan Gudoomiyaha Shirkadda.

5) Saamiga shirkadda lama iibin karo iyadoo aan oggolaasho laga haysanin Mulkiilayaasha Shirkadda, haddii qof saamileyda ka mid ah uu doono in uu iibiyo saamigiisa, wuxuu marka hore la socodsiinayaa Mulkiilayaasha Shirkadda, qoraal ayuu ku ogeysiinayaa isagoo raacinaya tilmaan buuxda oo ay ku cadahay inta saami ee uu gadayo iyo cida uu ka gadayo, wuxuuna arrintaas ku ogaysiinayaa mudo ku siman ilaa 30-maalmoood gudahood, haddii laga waayo Mulkiilayaasha cid ka iibsata wuxuu xaq u yeelanayaa in uu ka iibsado qof kasta oo uu doonayo, waxaa oggolaashaha iibkaasi imaankaraa shan iyo tobon cisho kadib maalinta Shirkadda la aas'aasay.

6) Haddii qof mulkiilayaasha ka mid ah uu geeriyoodo qaybtii uu shirkadda ku lahaa waxaa la wareegaya dhaxaltooyadiisa ama dadka dhaxalkiisa iska leh waxaana booskiisi istaagaya qofkii ay u wakiishaan dhaxaltooyadu soona siiyaan warqad wakaalad Sharci ah oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah, waxayna ku dhaqmayaan xeer-hoosaadka shirkadda.

8) Waxaa la kordhin karaa mulkiilayaasha marka ay isla oggolaadaan mulkiilayaasha shirkadda iyadoo loo eegaayo saamila kaste saamigiisa.

Qaybta 3aad

❖ Xaquuqda xubnaha saamileeyda ah

1. In uu helo warbixin ku saabsan hawlaha shirkadda sanadkiiba hal mar.
2. In loo sheego faa'iido iyo khasaaro waxii soo gaaro sanadkiiba.
3. In loo sheego marka la iibinayo ama la kordhinaayo samiyada shirkadda.
4. Waxuu shaqaale ka noqon karaa shirkadda haddii uu buuxiyo shuruudaha laga rabo booska banaan.

YASIN XA NOOTAAYO BANAADIR TIMOCADDE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-9033333/ +252-61-9592861
E-mail Address: timocadde@banaadir.com
HQ office: timocadde@banaadir.com



5. Waa inuu helaa cadayn ama shahaado mujinaysa saamiyada uu ku leeyahay shirkadda iyo qiimahooda.

6. Waxuu iibsan karaa saamigiisa markii la sameeyo xisaab xirka sanadka.

7. Waxuu ka qeyb gali karaa shirka sanad laha ah.

Qaybta 4aad

Waajibaadka Milkiilaasha

Dhammaan (3) xubnood waxaa ku waajib ah qodobadan soo socda

1. Inuu xafido sirta shirkadda
2. Inuu dhawro sumcadda shirkadda
3. Inuu ka qayb qaato fikradaha lagu hormarinayo shirkadda
4. Inuu ka qayb galo shirarka muhiimka ah ee shirkadda
5. Inuu dhowro xeer hoosaadka shirkadda.

Qaybta 5aad

❖ Qaabdhismeedka iyo maamulka shirkadda

Maamulka shirkadda wuxuu ka kooban yahay sidaan hoos ku qoran:

1. Gole guud(General Assembly)
2. Guddiga maamulka (Board of directores)
3. Gudomihaya shirkadda
4. Gudiga fulinta
5. Gudiga hanti-dhawrka

Qaybta 6aad

❖ Shirka guud ee Mulkiilayaasha

- 1) Shirka guud ee mulkilayaashu wuxuu ku dhisan yahay fadhigga ay mulkilayaashu isugu yimaadaan go,aankii ay isku raacaan ee lagu gaaro shirkaas wuxuu mulkilayaasha ku waajibinayaa in ay dhowraan nin ogol iyo nin diidanba.
- 2) shirka guud waxaa wici kara gudoomiyaha waxaana shirka lagu qabanayaa meeshii uu tilmaamo, Ogeysiiska Fadhiyadda la isugu yeerayo waa in ay ku cad yihiin, Maalinta, Saacadda, Meesha fadhigga lagu qabanayo iyo arrimaha laga hadlayo, ogeysiiskaas oo sidaas u dhigan waa in Mulkilayaasha lagu gaarsiyo warqad qoraal ah ugu yaraan 15-maalmo ka hor maalinta shirka la qabanayo qofkii jooga dalka guddihiisa, kan dibadda ku maqana 30-maalmo ka hor intaan shirka la qaban.

KANISKA NOTIARY BANAADIR TIMO CADDE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-903333 / +252-61-5892861
E-mail Address: timocadde@hotmail.com
HO: timocadde@hotmail.com



3) Shirka guud ee Mulkiyayaasha waxaa gudoominaya Gudoomiyaha Shirkadda ama Maamule idman.

4) Shirarka shirkadda waa kuwo caadi ah iyo mid aan caadi ahayn.

B. shirka caadiga ah wuxuuna dhacayaa sanad walba 31 December, ujeedadiisuna waa in lagula socdo dhaqdhaqaaqyada shaqo ee dhacay mudadaas sida maaliyadda, shaqaalaha iyo wixii kale ee la xiriira horumarinta shirkadda waxaana ka mid ah

- ✓ Dib u eegida waxyaabihii qabsoomay sanadkaas
- ✓ Xiridda howl sanadeedkii hore iyo furidda howl-sanadeedka cusub
- ✓ Isu jeedin dhaliilo iyo bogaadin
- ✓ Go'aansiga maal-gelin cusub haddii loo baahdo sida xarun cusub IWM
- ✓ Xisaabtan
- ✓ Xilalka
- ✓ Wax ka bedelidda mushaaraadka

T. shirka aan caadiga ahayn waa kuwo ujeedadooduna tahay xalinta wixii si lama filaan ah u dhaca, markaas oo loo baahan yahay go'aano deg-deg ah in laga gaaro. Waana in xubnaha oo dhan saddex meelood laba jooftaa.

5) Go'aanadda ka soo baxa shirarkaas la fariisto waa in lagu qoraa buug u gaar ah waxaana qoraya xog-haye ay soo magacabaan Aas'aasayaasha Shirkadda, waxaana qoraalkaas wada saxiixaya gudoomiyaha iyo xog-hayaha shirka haddii xoghayaha shirka uu noqdo Nootaayo qoraalkaas waxaa saxiixaya gudoomiyaha iyo nootaayaha waana in ay ku cad yihiin qoraalkaas doodii shirka iyo go'aankii la gaarey,

6) ka baaqasho shir (kulan), Xubintii milkiile ah ee shir ama kulan ka baaqata sabab kastaba haku baaqatee waxay u hoggaan sameysaa go'aanada lagu gaaray kulankaasi ha ahaado sanadle, bille ama mid aan caadi ahayn, waxaase lagama maarmaan ah in xubintaasi ku maqan tahay cudurdaar la ogyahay oo waafaqsan shareecadda Islaamka.

XAFSIYADDA BANAADIR TIMOCADE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-903333 / +252-61-582661
E-mail Address: info@banaadir.com
HQ office: info@banaadir.com



Qaybta 7aad

❖ Mushaaraadka

Mushaaraadka Shirkadda waa laba nooc oo kala ah mid ku saleysan qoonda (rate) iyo mid aan ku saleysnayn:-

1. mushaarka aan ku saleysnayn qoondada Mushaarkani waa lacagta la siinayo xubin milkiile ama shaqaale ka ah shirkadda, lacagtaas oo lagu siinayo howl masuuliyadeed oo uu u hayo shirkadda sida, maamul, maaliyad, darawal, waardiye, nadaafad, gunno gaar ah IWM, Mas'uul ama shaqaale kastaa mushaarkiisa waxaa lagu go'aaminaya ama lagu sheegaa kulan sanadeedka ama kulanka aan caadiga aheyn. Waxaana go'aan ka gaaraya dhammaan **saddax (3)** Xubnood.
2. mushaarka ku saleysan qoondada (rate), Mushaarkani waa lacag ku bislaata shaqo la qabtay oo kaliya, mushaar badi iyo yaraana waxay ku xiran tahay hadba inta shaqo ee aad qabatay oo lagu daray (rate) lacageed ee loo qorsheeyay shaqada, Mushaarkan qoondadiisa (its rate) waxaa lagu go'aaminayaa kulan sanadeedka waxaana u xilsaaran fulintiisa howl-wadeeneda (maamula-yaasha) xarumaha kala duwan ee shirkadda.
3. Bixinta Mushaaraadka Kadib markii maamulka shirkadda uu soo gudbiyo liiska mushaar bixinta shaqaalaha oo ay ku caddahay shax (table) muujinaysa qoondada, shaqada iyo sida ay u kala leeyihiin, waxaa xafiiska maaliyadda looga baahan yahay bixinta mushaaraadka loo soo gudbiyay iyo soo gudbinta xisaab xir bille ah oo muujinayo heerka dhaqaale ee shirkadda.

Qaybta 8aad

❖ Gudoomiyaha ama Keli maamulaha idman

- 1) Shirkadda waxaa Maamulaya Mulkiilayaasha ama keli maamule idman waxayna Awood buuxda u leeyihiin in ay sameeyaan wax alle iyo wixii ku saabsan maamulka caadiga ah ee shirkadda.
- 2) Haddii hal xubin oo ka mid ah Maamulka uu xilkiisa ka dhaco, sababkasta ha ku timaadee waa in si deg deg ah shir guud ee ka kooban mulkiilayaasha shirkadda la isugu yeeraa si loo magacaabo xubintaas bedelkeeda.
- 3) Xubnaha guddigga maamulka iyo keli maamulaha idman waxay xaq u leeyihiin in loo celiyaa kharashka kaga baxa danaha iyo shaqada shirkadda.

XAFIISKA NOTARY PUBLIC BANAADIR TIMOCADDE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-9033333 / +252-61-5392861
E-mail Address: timocaddet@hotm.com
HQ office: timocaddet@hotm.com



Gunnada la siinayo guddigga maamulka ama keli maamulaha idman waxaa xadidaya shirka guud ee mulkiilayaasha shirkadda.

Qaybta 9aad

❖ Awooda gudoomiyaha shirkadda

- 1) Waa hogaamiyaha, hagaha, soçodsiiyaha hawlaha shirkadda.
- 2) Wuxuu awood u leeyahay in uu isugu yeero shirarka caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.
- 3) Waa kormeeraha dhamaan hawlaha shirkada.
- 4) Wuxuu awood u leeyahay in uu si ku meel gaar ah shaqada uga joojiyo agaasimayaasha waaxyaha iyo Shaqaalaha Muhiimka ah.
- 5) Wuxuu awood u leeyahay in uu cid kale shaqada si ku meel gaar ah ugu sii magacaabo mudo kooban.

Qaybta 10aad

❖ Mudada xilka gudoomiyaha

- 1) Mudada xilka gudoomiyaha waa 4-sano dibna waa loo dooran karaa.
- 2) Haddii ay gudoomiyaha ku timaado xil gudasho la'aan sababkasta ha ku keentee waxaa shaqada sii wedaya Maamulaha guud ugu badnaan mudo bil ah kadibna waxaa leysugu yeerayaa Mulkiilayaasha si gudoomiye cusub loo Magacaabo.

Qaybta 11aad

❖ Guddigga barista xisaabaadka Shirkadda

Guddigga barista xisaabaadka shirkadda waxay ku shaqeynayaan sharciga xisaabaadka caalamka oo casri ah.

Qaybta 12aad

❖ Maamulka Maaliyadda

- Waajibaadka Maamulka Maaliyadda
1. Inuu soo uruuriyo lacagaha shirkadda nuucey doonaan ha ahaadeen
 2. Inuu lacagta u maamulo sidii loo qorsheeyay
 3. Inuu xafido lacagaha shirkadda

YANUSKA NOUTARY PUBLIC BANAADIR
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-9033333/ +252-61-5592861
E-mail Address: timocadue112@hotmail.com
HQ of



4. Inuu soo gudbiyo xisaab xir cad Xilliyada looga baahan yahay
5. Inuu xafido dukumintiyada xisaabaadka ee shirkadda
6. Inuu u caddeeyo milkiila yaasha wixii mad-madow ka gala xisaabaadka inti lagu jiro sanadka.
 - laxisaabtanka maamulka maaliyadda

Maamulka maaliyada shirkadda waxaa lagula xisaabtamayaa waajibaadka kor ku xusan haddii uu gudan waayo si layacana ugu lumaan lacago shirkaddu leedahay milkiilayaasha ayaa xaq u yeelanaya in ay ku fuliyaan qodobada hoos ku cad:

1. Xilka qaadis - Milkiilayaashu waxa ay ka qaadaan xilka maaliyadeed ee uu gudan waayay
2. Meg-dhaw - Milkiilayaashu waxa ay u qabanayaan muddo uu ku bixiyo lacagihii ku lumay
3. Haddii uu ku bixin waayo mudadaa loo qabtay waxaa laga jarayaa milkiyadiisa, haddii uusan milkiile ahayn waxaa lala tiigsanayaa maxkamad

Qaybta 13aad

❖ Miisaaniyadda shirkadda iyo Xisaab xirkeeda

- 1) Sannad waliba marka la gaaro 31 December, waxaa la xirayaa Xisaabta Guud ee shirkadda, guddigga maamulka ama Keli maamulaha idman waa in ay soo diyaariyaan Miisaaniyadda sanadkii tegey. qoraaladda miisaaniyadda waa in ay ku cad yihiin Faa'iidada, Khasaaraha isla markaasna lagu soo tifaftiro xaaladda ay ku sugan tahay hantida shirkadda.

Warbixinadda guddigga maamulka iyo kan baarista ay soo qorayaan waa in ay xisaabta miisaaniyadda la socdaan.

- 2) Sekada waxaa laga bixinaya Faa'idada iyo raasulmaalka shirkadda marka la isku daro iyo 15% loo goonaayo aasaasayaasha shirkadda kadibna

KAPISWA NIICHI SAHO BANAADIR TIMOCADE
BANAADIR NOTARY PUBLIC
Tel: +252-61-9033333 / +252-61-5592861
E-mail Address: timocade114@hotmail.com
HQ: BANAADIR, Somalia



- laga gooyaa 5% oo loo keydinayo ka hortaga kharashka lama filaanka ah oo ay shirkaddu la kulmi karto sannadka cusub ee soo gelaya,
- 3) lacagtaas faa'iidada ah, kadib markii laga gooyo keydkaas, inta harta waa in hal bil ama 30-maalmoood gudaheed loo qaybiyaa Saamileyda shirkadda.
- 4) Faa,iidada iyo khasaaraha waxay u dhigmayaan qaybta ay xubin waliba ku leedahay hantida guud ee shirkadda.
- 6) Faa,iidada waxaa la qeyb sanayaa markii la bixiyo sakada ka dib, waxaana go,aaminaya aas'aasaha Shirkadda iyo Saamileyda.

Qaybta 14aad

❖ Baabi'inta shirkadda iyo Bedelaada Xeerka

- 1) Haddii la damco in shirkadda la baabi'yo sababkasta ha ku timaadee shirka guud ee saamileyda shirkadda wuxuu magacaabayaa hal ama labo nin oo xira xisaabta guud ee shirkadda.
- 2) Xeerka waxaa lagu bedeli karaa go'aan ka soo baxa Shirka Guud ee Mulkiilayaasha shirkadda iyadoo loo tixgelinayo Awaamiirta iyo Nidaamka uu sharcigu tilmaamayo.
- 3) Wax allaale iyo wixii aan halkaan ku qorneyn waxaa loo raacayaa sida uu qabo Sharcigga Islaamka & Xeerarka J.F.S. ee quseeya shirkadaha noocaan ah.
- 4) Nuqulkaan wuxuu ka koobnaan doonaa Seddax Nuqul oo kaliya labo waxaa qaadanaya Aas'aasaha Shirkadda & Samileyda Shirkadda nuqulna wuxuu u harayaa Nootaayada.

Saxiixa milkiilayasha Shirkadda


1. Daahir Aadan Maxamuud

2. Abdirizak Mohamed Ahmed

3. Farah Mohamed Salad

Xafiiska Nootaayadda Banaadir Timo Cadde
Dr. C/raxmaan Maxamuud Cali (Timo-cadde)

By: Dhowrano



NOTARY PUBLIC
MOGADISHU, SOMALIA
Dr. C/raxmaan Max'ud Cali, (Timo-cadde)
Timo-cadde114@hotmail.com
Mogadishu, Somalia

Ministry of Transport and Infrastructure
Ministaraada Gaadiidka

Apprentice Driving License



13683

04/02/2013

Daahir Aadan Max'ud

03/02/2022

Somali

01/01/1969

Mogadishu

D





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 18/01/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **DAAHIR AADEN MAXAMUUD** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1330/T.P.N/25, Tr. 12/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	DAAHIR AADEN MAXAMUUD
La Wakiishay	Dhul iyo Saami
Sifada Dhulka	
Cabirka	20X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Kaaraan
Lotto Lambar	
W.M.L	B197/102245/021, Tr. 16/08/2012 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Sifada Saamiga	
Shirkadda	Shabeele A2 Well Drilling Civil Engineering General Contarctots Co
Activity Report	30%
Taariikhda Wakaalada	12/01/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **DAAHIR AADEN MAXAMUUD**, Leh Tel No. **0615519912**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

DAAHIR AADEN MAXAMUUD